

## **HORDHAC**

Xiliga cusboonaysiinta medallion ka ee magaalada Seattle 2023/2024 waxa uu bilaaban doona Abriil 1, 2023, oo uu dhamaan doonana Juun 30, 2023. Waxa jiri doona muddo laba isbuuc ah oo fadli ah ka hor inta aan la qiimayn kharashyada soo daahida laga bilaabo Julaay 15, 2023. Sidii sanadihii hore, waxaanu waydiisanaynaa ururada iyo shirkadaha inay si balaaran u wadaagaan macluumaadka cusboonaysiinta medallion ka.

## **XAQIIJI (AMA HEL) SHAHAADADAADA CASHUURTA GANACSIGA EE SEATTLE**

Kahor inta aan la bilaabin cusboonaysiinta medallion ka, waxaan si adag u soo jeedinaynaa codsabayaasha inay booqdaan **bogga shahaadada cashuurta ganacsiga ee magaalada** si ay u helaan ama u cusbooneysiyaan shahaadada ganacsiga ama ay u xareeyaan foomamka canshuuraha ee la xiriira. Dhameystirka tillaabadan waxay kaa caawin doontaa in habka cusboonaysiinta medallion ka ay u fududaato.

## CUSBOONAYSI MEDALLION KAAGA

### Ka Cusboonaysiinta Online ka

- Sameeyso **Akoon Xariirka Adeegyada Seattle** haddi aanad hore mid u lahayn.
- Isticmaal akoonka qeybta iskaa loo buuxsan karo si aad u dhammaystirto cusbooneysiinta.
- Ka bixi online ka adiga oo isticmaalaya kredhid kardh - muhiim ma aha in telefoon la waco ama xafiiska la booqdo!

### Codsiga Adeegsiga Emailka

- U soo dir sawirka diiwaangelinta baabuurkaaga **taxicab@seattle.gov**.
- Hubi in baabuurka la xidhiidha medallion ka uu ku baasay baarista badbaadka mudo 12 kii bilood ee la soo dhaafay ah taas oo uu smaeeyo **makaanik City gu aqoonsanyahay**.
- Xaqiiji in dallaaliyaha caymisku uu u soo diray insurance policy/binder caymiskaaga oo aan dhicin **vehicleinsurance@seattle.gov**.

### Ka Qeybgal Workshop

- Laga bilaabo badhtamaha May, shaqaale matala City ka ayaan bixin doona aqoon-is-weydaarsiyo ay uga caawiyaan dadka haysta medallion habka online ka looga cusboonaysiisto. **Waqtiyada aqoon-is-weydaarsiga waxaa lagu bixinayaa balan haday jirto oo kaliya.**
- Balanta goobta iyo taariikhda aad doorbidaysaba waxaa lagu qabsan karaa online ka. Waxaad heli doontaa iimayl xaqiijinaya faahfaahinta ballanta.

## TIXGELINO KALE OO MUHIIM AH

### Baabuurta leh magacyo dib loo dhisay

Haddii aad ku darto baabuur leh magac dib loo dhisay oo aan waligiis taksi ahaan loogu shaqayn ama joogto ahaan loogu shaqeyn, waxaad u baahan doontaa baadhis qaabka baabuurka iyo barkinta shookaanta ee shilka loogu tala galay oo dhamaystiran oo uu u **sameeyo makaanik City gu aqoonsanyahay**.

### Xadka Da'da Baabuurka

Joojinta ku meelgaadhka ah ee lagu hakiyay in gaadhiga dadiisu 10-sano ka badanin lama bedalyo ilaa inta ay City ga iyo Degmaduba ay soo bandhigayaan sharci cusub oo 15-sano gaadhsiinaya da'da

baabuurta taksi ahaan loogu shaqeyyo ama si jooqta ah loo shaqo geliyo. City ga iyo Degmaduba waxay ku rajo weynyihiin in da'da cusub la hirgeliyo intaan la gaadhin Disember 31, 2023.

### Egintaanka Mitarka Taksiga

Eegitaanka in uu mitarka taksigu si sax ah u shaqeynayo ee loogu tala galay dadka baabuurtooda ama ururada ay ku jiraan bedelaya waxay u baahan doonaan inay balan ka sameystaan xafiiskayaga ku yaala 805 S. Dearborn St. Seattle, WA 98134. Balamahaas waxa la samayn karaa wakhtiga cusboonaysiinta medallion ka.




### Wareejinta Lahaanshaha

Wareejinta lahaanshaha ee la sameeyo wakhtiga cusboonaysiinta waxay u baahan doontaa **in ikhtiyaar ahaan loo buuxiyo foomka wareejinta medallion ka** oo lagu diro iimaylka [taxicab@seattle.gov](mailto:taxicab@seattle.gov). Wareejinta laguma dhamaystiri karo iyada oo la isticmaalayo Akoon Xariirka Adeegyada Seattle. Ma jiro wax lacag wareejin ah marka wareejintu dhacdo inta lagu jiro cusboonaysiinta medallion ka.

### Dearborn

**Caawimada cusboonaysiinta ee Medallion lagama heli doono goobta 805 S Dearborn St.** Caawimada, waxaad kala xiriiri kartaa wakiilka sharciyeynta laysanka ee taleefanka lamberkiisu yahay (206-386-1268) ama iimaylka ([taxicab@seattle.gov](mailto:taxicab@seattle.gov)) ama balan u sameyso workshop ka cusboonaysiinta medallion ka ee soo socda.

### Isticmaal Koodhadhkan QR si aad u hesho macluumaadka

<p><b>1. Shahaadada Cashuurta Ganacsiga ee Seattle</b></p> 	<p><b>2. Adeegga Macmiilka iyo Ballamaha Aqoon Wadaaga (Balan qabsiga)</b></p> 
<p><b>3. Akoon Xariirka Adeegyada Seattle</b></p> 	<p><b>4. Foomka Wareejinta Medallion ka</b></p> 
<p><b>5. Makaanihada City gu Ansixiyay ee Baarista Gaadiidka (Badbaadada, Qaabka, iyo Barkinta Gooshaanta)</b></p> 